

QABRIGII MAALKA

"Dulmi maa duugmaa? Manii la daboolo na, waa soo daahiraa!"

(Reer Banaadir. [Maahmaah](#))

KACDOONKII ka dhashay Xamar, caafimaad ayuu u noqday jirrooyin badan. Culimadu horey u ogeyd in waahore la soo dejiyay daawada lagu **tawaawilo** bukaansocodka qaarkii. Haddii se aan uu shacabku gurmadeen, reer Xamar badan ayaa halis ugu jiri lahaa in ay qaadaan ama u dhintaan *cudurro* kala duwan oo laga soo faafin jiray gobolladii dalka qaarkood, iyo dalal kale ee shisheeye ba.

Aaggii Raqayga, dukaankii reer Shumbursuri, waxa maanta dhinaca ku haya daarad ka soo hartay jasuur burburay. Ciid cusub ayaa bartanka u tuunsanayd, taas oo goor dhowayd laga soo faagay god ku oollaa daaradda dhexdeeda. Galabtii ugu horreysay Ololehi Xaadhibaankii Xamarweyne, dadkii meeshaas fiiqayay, marka laga reebo Cijicadde Taakoow—bacadle gaariyool ganaci ku haysta—xaanidaas iyada ahayd, qof kale ee arkay ma jirin. Jasuurku waxa uu kuyaal agagaarka Suuqii Koodka Xamarweyne. Bacadlehu na, aroor waliba halkaas ayuu u shaqtagaa.

tawaawil *fak*:
bukaan lagu
baxnaaninayo
dhir dhaqameed
(sida dharjo,
gagabood, lebiyar,
subagshiil,
gumarka, iyo bari
idaad oo la isku
daray ... iwm.

Aqoon-maroodi: ladhkab ka kooban erezada kala ah "aqoon iyo maroodi". Waayo waxa jira "xer" iyo "xer-maroodi" ama "askar" iyo "askar-maroodi" ... iwm. Marka Soomaalidu ereziga "maroodi" ay erey ku kabaan: waa yasid lagu muujinaya badda laga hadlayo in aan uu aqoon u lahayn qof la tilmaamayo. Haddaba "aqoon-maroodi" u garo qof leh aqoon ku saleysan **bowsi**—asii aan waxkabarun dugsiyo la aqoonsan yahay—taas oo ay dadku qaar na ku sheegaan *cilmi-dheegood, faataa-dhungleys* ... iwm.

Cijicadde waa nin si uun uga indho curdoon reer Xamarweyne. Walow uu haatan ku nool yahay baraako (*mitirkuubo*) kutaal Suuqii Afleershe, Boondheere; iyada oo uu ka fursan waayo mooyee, weligii geed iyo guri toona, habeen madow, ma aan uu hoos seexan. Haddii uu ama gama'san ama uu baraarugsan yahay, labaddaraadle, wax baa jira ugu wakan, samada sare, in uu hadba ku dhadhabo. In kasta oo ayan magacyo u kala lahayn, **aqoon-maroodi** ayuu u leeyahay xiddigaha degaankooda, iyo jidadka ay ku kala gooshaan. Illaayo maanta la joogo, *waagii heegada*, waa ninka weli rumeysan: qorraxdu in ay u hoyato booraan ku taal hog la yiraahdo *Arra Gabballadhabo*; goorta uu dadku wada seexdo, in ay dheelmatiin ugu guddo cirkii bari; si waabeeriga xiga, haddana, ay dhankaas uga soo bidhaanto. Qofkii arka eeraankii cawo ee qorraxda; isaga oo aan eegmada ka dayn weli, xaabsada na cantoobooyin ciid ah, waxa uu rumeysan yahay, qofkaas isaga ah, in uu yeelan doono xoolo u dhigmo hadba wadarta iniinihii cammuuddii uu xantoobsaday! Kalsoonida buuxda uu ku qabo *xogtaas* ayaa na inta badan ugu wakan in uu cirkii hoos seexdo; habeennada aan ay caadadku jirn. Carrada ayuu se uga sii aqoon badan yahay xiddigaha: God haddii uu arko, waxa uu sheegi karraa waraabe, dawac, doofaar ama se dad koodii qoday—si doonta oo loo saantiro raadadka nafleydii qodday godadka iyaga ah. Bulshada ruun Caddoow-Uul ayuu uga faalin jiray *ifafaalooyin* soo mudh oran jiray; hadba na sida uu wax u sheego uun ayay runtu na noqon jirtay. **"Fur.daaaan.she,"** waa neenaas reer miyigii ay weli isaga ugu yeeraan. Waraabalahadalladii soo maray taariikhda, laga soo qaado cirifkii Caluula lagu na geeyo gosha Bush-Bush ayuu ugu weynaa. Sidii qof leh hibada garabdaar ama uurkumaanle, Cijicadde waxa uu kala sheegi karraa: shimbirtii didday, ka na duushay geedkii ay saarnayd wixii ay ka baqday in uu dad ahaa, in uu dugaag ahaa, in uu halaq ahaa, iyo in uu haad ahaa. Iin qurah ayuu se weligii soo lahaa: Cijicadde ma aan uu arki karin dabinka uu isagu ku dhici lahaa.

malluug magac labeed: hummag aan qeexnayn, muuq, ama bidhaan fog.

raqas magac labeed: qashin.
sabbaax magac labeed: kaloox, bacool, aleesha (angaleesha) xeebaha taal.

intihi fak: eegid, baarid, hubin.
gasbo magac dbeddigeed: bir la daro juuniga galleydu ay ku jirto, si xooga badar ah looga soo daadsho, loo na eego in gallaydi caaryaysatay iyo in kale.

haadun magac labeed: dad faqri, sabool, xubeer ah oo aan haysan hunguri deeqo.

sabbaar magac labeed: dhaqaalaha guriga, biilka ama masaariifta; baad iyo biyo, cuntada; koodhi ama gibir

Haddaba berigii xigay, isaga oo ku soo jarmaaday suuqii Koodka ayuu tuhmay **malluug** oo ka nuuxnuuxsanay gudeha daarraddii shalayto ay dhix tuunsanayd ciiddii cusbayd. Derbi meesha ahaa ayuu ugu dhakaday sidii diiq badar mooye ka dayaya: mase waa laba rag ah! Goor kasta oo ay xaggiisa soo eegaan ba, isagu na, luqunta iyo labada low ayuu durba meel isugu geynayay sidii goroyo ay ufo bannaan ku heshay. In cabbaar ahayd waxa uu meeshii hogashada ugu kuurgalo, kadib ayuu arkay xirmooyin baco lagu dhaaaray in ninkood ba jeebabka surwaalkiisa uu ku sii camcaminayay. Sidaas ayuu na ugu jeeday sidii ay ciiddii ugu celinayeen godki, sida dabadeed ay dhulkii ugu simayeen; **raqas**, dhexxaan, iyo **sabbaax** na ay ugu sii dul sayrayeen. Meeshii na dhaqse ayay uga tageen, iyada oo jeebabkoodii la moodo caman taqsiin lagu kuusay. Dharab ay cadceeddi ku soo baxday oo kaleeto ayay na ugu sii kala dhix libdheen luuqluuqyadii Xamarweyne.

Bartii ay ka dhaqaaqeent ayuu durba dul kadallobssaday. **Gasbo** uu ku **intihi** jiray juuniyada ay galleeydu ku jirto ayuu qotadii hoos u ruubiyyay. Isla haddiiba waxa uu dareemay dhaxalka godka hoos ceegaagay. Cilcilawgii giyigii waaberii waxa judhiiba uga dhix birbiray hiddidiilooyin waaweyn: Hodantooyo uusan hore dhulka ba uga sii filan jirin, hanti u horseedi doono ganacsi ka wanaagsan kii suuqii Koodka, **haadunkii** reerka oo gabalkiisii sii dhacahayo, iyo daboyaqaqadii muranka, kii saabsanaan jiray tashiilista **sabbaarka** reerka ee kala dhexsan jiray isaga afadiisii.

Shaqadii maalin oo idil suuqa la surnaan jiray ayaa ciyoontii ba u soo urtay. Qof dhoohan oo kale ayuu ku soo baxay: Dan dambe na kama aan uu lahayn in uu cagaajiyo ciyaalkii dafayay badeecaddii u saarnayd gaarigacankii. Indho dambe ee madaxisii ku yiil, miyaa ba saa u fiirin karayay liin bolol ahayd, tubeey moos baqbaq ahayd, goobo ka koobnaa yaanyo, mafafaay, canuuni, iyo seeytuun wada qarraray oo doc kasta na ka dhiimayay, duqsigu na uu meel walba uga yoonsanaa. Maankiisa waxa buuxiyay hammi iyo qorshayn ku aaddanayd sida uu dhaxalkaas dhulka uga soo saari lahaa iyada oo aan ay cidi arkaynin: "Haddii aw iigu juro calaf! Maya! Wallee gaari dambow kuma riixol!" ayuu islahadal ku yiri, "hal mar bes ooy orraxdu hoyataa ii hertay!" Maalintaas oo dhan waxa uu sugil'aa goortii uu uga sheekeyn lahaa naagtisii, iyo Ibrow Goonle, walaalkeed iyada ku hooyo ahaa—fiidki uu labadooda arki lahaa, uga na warrami lahaa xabaasha ku taal aaggii Koodka.

"Warrrr! Anigaa idiin haaya!" ayuu yiri cabbaarkii ay gacantogaaleynayeen soor eedaq ku iidaaman oo xeero la taallay. "Berri, an ya faqri ways deeyney! Qabrigii maalka aan soo arkay!"

doobir magac dbeddigeed: ayyaanka, nasibka, calafka, cawada, qaddarka.

Ibrow oo kasi waayay waxa *qabrigii maalka* uu ka waday, ayuu uga sii faalleeyay dhacdadii **doobirtu** ay isaga saakayto marqaati ileed uga dhigtay. In kasta oo uusan arkin tilmaanta uu sanduuqu yeelan karayay, waxa uu u sawiray in u ekaa kuwa lagu qaato agabka baabuurga lagu dayactiro; lacagta ku jirtay na in ay doollar ahayd. Baafan, iyadu kuma socon warka iyo naawilaadda ina Taakoow. **Siiradii** ay hore ba u akhrisanaysay ayay faynuustii kula sii dhowaatay. Buruuudshiilka ay dad oo idil qorqodeheeda ku sheegi jireen, iyadu weligeed biid na kama ayan rumeysan.

"Khabri miyaa amii kale khuuuraha?" ayuu Ibrow weydiiyay. "Intee ku aragtii? Ii sheeg *nooh*, mihi *shimteerradii* ay taasho?"

baadifad *magac labeed*: qofka hela (heleha) shaygii, ama xoolihii lumay (baadi).
fuf *magac labeed*: caws baxa xilliyada engegan.

Weydiimahan talantaalliga u dhacay ee uu seeddigii iska soo daba celceliyay, Cijicadde waxa ay ku dhaliyeen shaki ka joojiyash nashaaddadii uu u sii hayn lahaa daldalankii badnaa. Waxa ba taas uga sii daranayd, Ibrow oo loo aqoonsado **baadifadkii** soo arkay qabriga: "Haddaan hadda u sheego, ina baxyo aw usugoo watto haraaddigi ka soo heray ciyaal Benadirki, warka na afarta berjaho ula rooryo, aw sanduuqii na hee, saas gacanta duul kale u geli doonaa, day! An ma taasaan ka yeelaa hee?" ayuu uurka uga dunuunucay. Santuukhii yiddidiilooyinkii waxa uu isla haddiiba isu rogay **fufkii** tallanka, xinka, muudalnimada, cawritirka, xistiga, masuugnimada, iyo hiifka iyo haaraanka.

"Anaa kuu og meeshaw *qabrigu* ku yaal! Aniga jawiya haa na ogaahaal!" ayuu ku yiri seeddigii, "Eebbeheey na ha kuu naxariisto, minaad warrankaas duul kale isugu sheegtid lee!"

Foogtii xigtay, kolkii uu ku soo dhowaaday daaraddii jajabnayd ee uu sanduuqu ku duugnaa, waa uu alaalabbaqay. Isaga oo aal u dhuukinayay, suulasha na ku soconaya ayuu godkii meel agtiisa ahayd, asii u jirtay fogaan gacankuhaabad ahayd, jilayay na sidii qof saxatoonaya ayuu si boobsiis ahayd u qufay rugtii. Si na laablakac ayaa cabsidii haysay ay ugu keentay; si kale na laabtii waa ba ay u degtay: Sanduuq quful maar ah uu ku jabanaa ayuu dhukii ka soo siibay. Xoogaa ayuu sanduuqii himliyay; mase ganta ayuu hayaal! Isla jeer ahaan na, go' uu ugu soo talogalay ayuu ugu duubay sidii addinkii uu shilkahu beri ka dhaawaci jiray, ku na sii xirxiray xarig bunji ahaa. Carradii ayuu godkii dib ugu duugay. Dabadeed na, boolidii ayuu la soo cidgalay. Baafan iyo Ibrow na, qofkood na ma joogin gurigii.

Hore ayuu ka billaabay in uu sanduuqii god kale u qodo. Goortii in cabbaar ahayd uu qodayay ayuu culays gadaashiisi ka dareemay. Kor ayuu u qooraansaday si uu u eego cidda soo joogsatay dhabarkiisi; saa cidi ba ma joogto! Qodistii ayuu halkeedii ka sii watay. Dirqigii uu ku aasay sanduuqii, mase waa tan Baafan oo ku soo tukatay masaajid guriga agtiisa ahaa!

Baafan, haddaa waa marwadii reer Cijicadde. Guriga na waxa uu hoos tagaa dowladdeeda haysata *Libida Diidmada*. Cijicadde xumaan gaamurtay ayuu iyada laabta ugu hayaal. Goordhow na, waxa uu ku hanweyn yahay in uu iska furi doono. Wacdigaa, waanooyinka ku saabsan aakhirada, iyo qildayga ay sida joogtada ah ugu raadinayo; si ayan xaaraan u gelin caloosheeda, ayuu ku nacay. Mid ayuu na aad u og yahay: haddii islaanta Baafan Mayye la yiraahdo uu sii haysto, dheeraa ama dhowaa, in gaarigacankii uu dib u riixi doono. Haddii ay jirto hawl la naco na, meheredda kaariyool waa shaqada uu ugu neceb yahay.

Maalintii Jimceha, gelinkii hore oo idil sariirtii ayuu ku dhammaystay. Xaggan isu geddi, dhan kale isu rog, galgalad ayuu intaa ka bixi la'aa. Waxa uu is nabo ba, kuleylki jingadda ayaa ka soo saaray baraakadii. Waabkii (*walambadii*) ayuu u soo baxay, ka na qaatax xaaqin si uu carradii cusbayd iyo tii duugga ahayd isugu soo qaso. Dabadeed na baaldi biyo ah iyo daasad (*koombo*) ayuu laga galay baraakadii, ku na u bilbilay gawaankii dhabbisnaa. "Yaaa yah! Ee xalay booddaan ka seexa waayee," ayuu ku yiri Baafan oo walambadii ku werdinaysay, "walleen iima jeeddid biriga seey dhacsaalu ii hayso!" Indhaha na intaa waxa uu ku hayay boolidii uu ku aasay sariirtisa hoosteeda, isaga oo weliba na ka sii fiirsanayay goorta uu jebsan lahaa sanduuqii tuugada: "Maal aanan guri dadow ka soo xadin, ogaaro la ii cadaabaayee!" ayuu keliglii iska weydiiyay.

Habeennimadii wax uu ku riyooyonyay isaga oo guryo badan dhisanayo, babuurro kala jaad ah, Cagafcafyo, iyo beero badan iibsanaya. Catuirkii waxa uu isku dul dhambiiriyo ba, kol ay ahayd habbeen barkii ayaa waxa soo dhacday dhibicdii ugu horreysay ee roobkii xagaaga. Lamayeerigii baraakada sitaahoo cirkaa jay lagaga soo qayay ayuu u gees ka qacqacleeyay. Saxansaxadii qaboobayd awgeed, Baafan cuncunkii roobsugowgii hayay ayaa ba uga yaraaday; iyada oo aan meel na ka nuuxsanayn ayay khuuraadii uu ku oqoon jiray la buflaysay. Yabqanka is biirsaday ayaa talo ku dhaliyay: "*Furso* tan ka wanaagsan ku soo mari maysee; Cijicaddow ammeey kuu roon tahay inaad hadda sanduuqa qararamso...!"

Arooryadii hore, sidii caadadu u ahaan jirtay, ayuu gurigii ka jarmaaday. Maanta se, si ka duwan maalmihii hore, waxa uu gurigii ka baxay isaga oo jeebabkiisii ay wax ka kuusnaayeen. Maanta, si ka duwan beryihii hore, waa uu ka leexday jidkii uu weligii ku jarmaadi jiray. Hantiile waddooyinkii Xamar dhex mushaaxaya oo kale ayuu ba isu haystay. Markii ugu horreysay weligeed ayuu dareemay, dareenka niyadda u qaboojiya maalqabeennada adduunka, walow wax lacag la yiraahdo aan ay gacantiiii weli ku soo dhicin. Waayo santuukhii ba waxa ka buuxay xabag uu garan waayay geedkii laga soo guray. Si uu yeelo haddii uu garan waayay, talo kale ayaa is tustay: "Ammaan saqajaankii Ibrow ahaay looga maarmi doonin!"

Haddaba, gurigii ayuu gadaal ugu soo laabtay; Ibrow na hurdadii ka jafay.

"Arrooy, waxaaaaan, waxeey yihiin ma ii sheegee?"

"Waaalla kasaa ne. hashiish aa la dhahaa."

"An maan yaabin! Ee ina Goonlow, beecinta iyo baasada maysla qeybseynaa?"

"Haah! *Va ben!* Hayye waayehay!" ayuu Ibrow ku yiri seeddigii. "Belledka in liis ilaashado waaye hadda. Wadaaddo aa meeshii kasto buuhaan. *Non lo sa?* Ma ba og tihid miyaa? Khoftii wahaaneeti kalle luuu khabto waa la tummaahee dey! Halkoo mar lee, jumlo intii loo gado; saaseeti aa na barako badan. Anii dadkoo aan kuu kasaa Dadkoo lamma bilood muqsusha madfac ma ku ridin. Hashiish la'aanee, alooshood bo waa dhegti. Laakiin *soldi*, beeso, beeso badan eey kaa haayaan!"

Cijicadde afkalqaad ayaa ka soo haray. Intii cabbaar ahayd na ciil ayuu la cabbursanaa. Si weyn ayuu uga carooday tashiga laydha ka raacay: in Ibrow uu ku halleeyo xoolihiisa. Hadda na, sida aalaa ba dhici jirtay, waa uu iska illoobay. Waxa raalligelisay rukunka badan uu seeddigii xabagta ka iibin kari doono, iyo isaga oo is garwaaqsiiyay in uu ku gedobaran doono.

Isaga iyo Ibrow xabagtii ayay isla suuqgeeyeen. Rukun aad u badan ayay na horey ka heleen. Lacagtii ayay ba dhib kala kulmeen sidii ay u qaadi, iyo wixii ay ku qaadi lahaayeen. Shandado lama haysto! Bacohii na buuksam! Cimaamadohii madaxa ugu duubnaa—wadaaddo ayay isu ekeeysiinayeen illeyne—ayay lacagtii ku gunteen. Ibrow baa seeddigii ka codsaday: "Haddiin geelkoo khalanno aa noo fiicnan! Hilibhiliboow aa si hun ii haysto!" Ogow se, midkood ba makhaayad kolkii uu ag marayo uu dhareerka u liqi jiray ayaa maankiisa ku taagnayd. Sidaas ayay na isku nabadeeyeen, iyaga oo wada riyaqsan, ku na ballameen, sidii caadadu ahaan jirtay fiidadkii in ay gurigii ku kulmaan.

Saacado badan se kama ayan soo wareegin welii, kolkii ay dib isu arkeen. Yaab la arag! Qol *mitirkubadii* ka qurxoonaayaa Cijicadde iyo Ibrow la isu keenay. Ninkood ba se, waa uu ka dhamaa in uu weydiyo kan kale waxa meesha ka soo riday.

Shan beri kadib ayuu Cijicadde ogaaday haybtii labadii malluug, ciddii ay ahaayeen! Ragga qolka kula xirnaa, marka Ibrow laga reebo, labada kale waa ba iyagii. Toogtii ay tuugtii isaga kolkiisii ka wareysteen waxa lagu soo xiray, Cijicadde waxa uu u sheegay in lagu soo eedeyay daddilnimo: in uu dad dilay; meydkii dilankii na uu sanduuq ku riday, dabadeed na uu ku dhex aasay daaraad ka soo hartay jasuur jabjabay ee dhinaca ku haya dukaankii reer Shumbursuri. Raggi waxa uu ka raariday in daaraadda laga soo dhex qabtay uu u galay si uu isu soo fududeeyo uun. Ha ahaatee, in uu booliskii u sheegay in uu arkayay labo nin oo meesha ka sii baxaysay! Laakiinse mugdigii jiray awgii, aan uu tilmaami karayn! Waxa uu u sii sheegay in booliskii meeshii qodeen, ka na heleen canug meyd ahaa. Naxdin awgeed, labadii rag ahaa, inta mid ba kii kale eegay, misana hal mar ah afka wada qabsadeen!

Galabnimadii, Jimcehii xigay ayaa afartoodii la keenay bannaankii la oran jiray *Piazzza Jama*—haatan na loo baxshay *Dulmi Bacaarbse* (Dulmi Tume).

Wadaad xoog weyn oo lebisan dhar cadcad, madaxa na ay uu saaran tahay koofiyad ah *qubbaca*, gacan na ku sita karbaash galaalan oo laga sameeyay *suun dibi*; foolkiisa na uu la gommoday salaad darteed; haddana ay ka muuqatay carada ka haysa mujirimiinta *cudurrada* faafiya, ayaa kol ba mid, ka mid ahaa caasiyadii Eebbe la horkeenay—qofkoodii ba lixdan karbaash ayuu haraggii uga siibay.

"Allaahu Akbar!" ayuu oranayay dulmilowgii u adkaysan waaya xanuunkii nadiga.

"Allaahu Akbar!" ayay oranayeen daawadeyaashii na, goor kasta oo jaydalkii lagu shabiicciyo mujrimkii, iyaga oo muujinayay sida ay ula dhacsanayeen *Kudhaqanka Shareecada Islaamka*.

Halabo: xoolo baadi ah uu qof aan lahayn iska qaato, u na dhaqdo sidii wax uu isagu iska leeyahay oo kale; hanti.

Hulaaqin: goorta caws oo kale dab la qabadsiyo; si aal ah na uu u huro, aalaa ba qiiq bixiya; hase ahaatee aan yeelan holac.

Tumowgii ka bacdi, sanduuqii ay afartoodoo ba wada ogaayeen, iyo xabagtii ka buuxday—**halabadii** Cijicadde—dab ayaa lagu **hulaaqiyay**. Labadii malluug iyo Cijicadde waa ay is eegayeen, mar na qiiqii cirka ku sii sulsulayay ayay isndhaha la sii raacayeen.

Baafan Mayye, sidaas ayay ninkeedii iyo walaalkeed ba ugu *gurmatay*, gurigeedii na xaaraan soo geli lahayd uga hortagtay. Maalintii Sabtiga, Cijicadde Taakoow na waxa uu ku jarmaaday Suuqii Koodka.

DHAMMAAD

F. G. Dhacdo la mid ah sheekada reer Cijicadde Taakow ayaa jiri karta. Sidaas darteed, haddii ay si uun ugu ekaato, cid nool ama ba cid dhimatay, waxa aan halkaan ka awaajinayaa in aan loola jeedin qofna, tahay na sheeko la halabuuray uun.

Afeef: Aragtida qoraalkan waxaa leh qoraag a ku saxiixan

Faafin: www.SomaliTalk.com | Sept 21, 2006